



The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraax:XRW/0557/11/2023

09/11/2023

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS



=Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=

**UJEEDDO: SOO GUDBIN HINDISE-SHARCIYEEDKA AMNIGA SAAYBARKA
SOOMAALIYA**

Mudane Guddoomiye,

Innaga oo ka anbaqaadeyna Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.52.11.23 ee 09/11/2023, kuna saabsan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Amniga Saaybarka Soomaaliya" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Hindise-sharciyeedka Amniga Saaybarka Soomaaliya si waafaqsan Dastuurka Kumeel Gaarka ah, waxa uu soo maray dhammaan habraacyadii loo asteeyay.

Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbinaynaa Hindise-sharciyeedka sare ku xusan, si aad uga gudataan waajibaadkiina dastuuriga ah. waxa aan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta "Hindise-sharciyeedka Amniga Saaybarka Soomaaliya".

Xiriir iyo wada shaqeyn wacan.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS





The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac:XRW/222/11/2023

Tariikh: 09/11/2023

Ku: Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknooloojiyada Xukuumadda JFS =Muqdisho=
Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada =Muqdisho=
Og: Guddoonka Golaha Shacabka =Muqdisho=
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=



UJEEDDO: GO'AAN GOLE, ANSIXINTA HINDISE-SHARCIYEEDKA AMNIGA
SAAYBARKA SOOMAALIYA

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99^{aad} farqadaha (a), (b) iyo (c) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100^{aad} farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqadda summadeedu tahay WIT/XW//085/2023 ee ku taariikheysan 25/10/2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknooloojiyada.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.52.11.23 ee 09/11/2023, kuna saabsan ansixinta Hindise-sharciyeedka Amniga Saaybarka Soomaaliya oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda uu leeyahay Hindise-sharciyeedka Amniga Saaybarka Soomaaliya.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1^{aad}

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.52.11.23** ee 09/11/2023, kuna saabsan ansixinta **Hindise-sharciyeedka Amniga Saaybarka Soomaaliya** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2^{aad}

In si deg-deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka “**Hindise-sharciyeedka Amniga Saaybarka Soomaaliya**” si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.




Mudane, Hamza Gadi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS





Federal Republic of Somalia
The Ministry of Communications & Technology
Office of The Minister

Tix: WIT/XW/ 085/2023

Taariikh: 25/10/2023

Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

Og: Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS

Og: Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada

Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada

-Muqdisho-

-Muqdisho-

-Muqdisho-

-Muqdisho-

Ujeeddo: Soo-gudbin Hindise Sharciyeedka Amniga Saaybarka

Mudane Ra'iisul Wasaare,

Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada XJFS waxay si xushmad leh halkan ugu soo gudbinaysaa **Hindise Sharciyeedka Amniga Saaybarka**.

Diyaarinta Hindise Sharciyeedkan waxaa eegis ku sameeyay Sharci yaqaanada Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Guddi-hoosaadka Tiirka Horumarinta Dhaqaalaha, Wasaaradda Cadaaladda iyo Garyaqaanka Guud ee Dowladda si loo hubiyo inuu waafaqsan yahay Shuruucda Dalka.

Haddaba, Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada XJFS waxay ka codsanaysaa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha in Hindise Sharciyeedkan loo gudbiyo Xubnaha Golaha Wasiirada si loo ansixiyo.

Wada shaqeyn wacan,



Mne. Jaamac Xasan Khaliif

Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada



THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF STATE ATTORNEY GENERAL

SUMMAD: XGG/410/2023

11/10/2023

Ku: Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknoolojiyada
Ku: Agaasimaha Golaha Wasiirada
Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS

Muqdisho
Muqdisho
Muqdisho

Ujeeddo: Talo Sharci oo ku saabsan "Hindise-sharciyeedka Sharciga Amniga Saaybarka Soomaaliya"

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, oo tixraacaya Warqadda Summaddeedu tahay: Summad: WC&AD/XAG/615/09/2023, ee Tr. 03/09/2023, Ujeeddadeeduna ahayd Soo-gudbin "Hindise-sharciyeedka Amniga Intenet-ka Soomaaliya", kana soo baxday Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976, waxa uu halkan idinkugu soo gudbinayaa kaddib markuu ku daray talooyin sharci sida inuu magacii ka dhigay "**Hindise-sharciyeedka Sharciga Amniga Saaybarka Soomaaliya**" iyo qodobbo kale oo muhiim u ah Hindise-sharciyeedkan oo uu dib u qaabeyn Xafiisku ku sameeyay.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda markuu darsay Hindise-sharciyeedkan oo ah mid mudnaan gaar ah u leh Hannaanka amniga Saaybarka Dalka, waxa uu ku talinayaa Xafiisku in loo gudbiyo Golaha Wasiirada si ay u ansixiyaan, maadaama uusan ka hor-imaanayn Dastuurka, Sharuucda kale ee Dalka iyo Danta-guud, uuna Xafiisku ku daray Ra'yigiisa iyo taladiisa Sharci.

Ugu dambeyn, Xafiiska Garyaqaanka Guud waxa uu ku wargelinayaa Agaasimaha Golaha Wasiirada iyo Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknoolojiyada in nuqulka ku lifaaqan warqaddan uu yahay nuqulka asalka ah ee loo gudbinayo Golaha Wasiirada.

FG: Waxa halkan ku lifaaqan Hindise-sharciyeedka kor ku xusan.

Salaan qadarin leh


Avv: Aadan Dacar Maadey
Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA

Address: State House, Villa Somalia

Tel, +252 (0)613242015 | E-Mail: sag@sag.gov.so, archive@sag.gov.so



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**WASAARADDA ISGAARSIINTA &
TEKNOOLOJIYADDA XUKUUMADDA JFS**

***HINDISE-SHARCIYEEDKA SHARCIGA AMNIGA
SAA YBARKA SOOMAALIYA***

Tusmo

CUTUBKA KOOWAAD: QODOBBO GUUD	1
Qodobka 1aad: Magaca Sharciga	4
Qodobka 2aad: Qeexid	4
Qodobka 3aad: Ujeeddooyinka Sharciga	5
Qodobka 4aad: Baaxadda Sharciga	5
CUTUBKA LABAAD: KAALINTA HAY'ADDA AMNIGA SAAYBARKA QARANKA	6
Qodobka 5aad: Hay'adda Amniga Saaybarka Qaranka	6
Qodobka 6aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Hay'adda Amniga Saaybarka Qaranka	6
Qodobka 7aad: Qaabdhismeedka iyo Guddiga Amniga Saaybarka Soomaaliya	7
Qodobka 8aad: Aasaasidda Guddiga Amniga Saaybarka	8
Qodobka 9aad: Xilka Guddiga	8
Qodobka 10aad: Mudada Xil-haynta Hay'adda	9
Qodobka 11aad: Mas'uuliyadda Hay'adda	9
Qodobka 12aad: Gunnadda Xubnaha Hay'adda	9
Qodobka 13aad: Qaabka Magacaabidda Madaxda Hay'adda	9
Qodobka 14 aad: Mas'uuliyadda Maareeyaha Guud	10
Qodobka 15aad: Mas'uuliyadda Maareeye Ku-xigeenka	10
Qodobka 16aad: Sababta lagu waayi karo Xilka	10
Qodobka 17aad: Magacaabidda Kaabayaasha Muhiimka ah	11
Qodobka 18aad: Diiwaan-gelinta Kaabayaasha Muhiimka ah ee La Magacaabay	12
Qodobka 19aad: Hal-beegyada iyo Kormeerka	13
CUTUBKA SADDEXAAD: KOOXDA KA-FAL-CELINTA DEG-DEGGA AH EE KUMBUYUUTARKA	14
Qodobka 20aad: Asaaska Kooxda Ka-falcelinta Degdegga ah ee Kumbuyuutarka Soomaaliya (SOM-CERT)	14
Qodobka 21aad: Qeybta KOOXDA Ka-Fal-celinta Degdegga Ah ee Kumbuyuutarka, (CERTS)	15
CUTUBKA AFARAAD: WAAJIBAADKA HAWL-WADEENNADA KAABAYAASHA MUHIIMKA AH	17
Qodobka 22aad: Qiimeyn-xilliyeedka	17
Qodobka 23aad: Magacaabidda Saraakiisha Amniga Saaybarka	17
Qodobka 24aad: Waajibaadka Ka-warbixinta Shilalka Amniga Saaybarka	17
Qodobka 25aad: Ilaalinta Siyaasadda iyo Dhaqan-gelinta Habraacyada	19
Qodobka 26aad: Tallaabooyinka Amniga Saaybarka	19
Qodobka 27aad: U-hoggaansanaan La'aanta Waajibaadka	20
CUTUBKA SHANAAD: WADAAGISTA MACLUUMAADKA	21
Qodobka 28aad: Wadaagista Macluumaadka	21

CUTUBKA LIXAAD:QODOBBO KALA DUDUWAN	22
Qodobka 29aad: Xeer-nidaamiye	22
Qodobka 30aad: Baabi'in	22
Qodobka 31aad: Dhaqangal	22

CUTUBKA KOOWAAD

QODOBBO GUUD

Qodobka 1^{aad}:

Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "Sharciga Amniga Saaybarka Soomaaliya".

Qodobka 2^{aad}:

Qeexid

Haddii aanu sharcigu si kale u qeexin, ereyadan soo socda mid walba wuxuu leeyahay macnaha ku hor qoran:

1. **"Kaabayaasha Muhiimka Ah"** waxaa loola jeedaa hantida la taaban karo iyo tan danabaysan ee aan la taaban karin, shabakadaha iyo nidaamyada macluumaadka (Information Systems) uu go'aamiyo Wasiirka sida ku cad Qodobka 8aad oo qeexaya "hantida kaabayaasha aan la taaban karin" oo ay ka mid yihiin maskaxda kombiyuutarka (operating systems) ama Kaabayaasha software-ka ku salaysan, ha ahaadeen kuwo meel dhow (local) ama meel fog (remote) laga geli karo;
2. **"Amniga Saaybarka (cybersecurity)"** waxaa loola jeedaa ilaalinta shabakadaha iyo nidaamyada macluumaadka (information systems) ee laga difaacayo gelitaannada aan la oggolaayn (unauthorized) ama weerarrada, iyadoo ujeeddadu tahay hubinta (verification), helitaanka (availability), hufnaanta (integrity) iyo qarsoonaanta (confidentiality) macluumaadka la keydiyey, la isticmaalay (processed) ama la gudbiyey (transmitted);
3. **"Shilalka Amniga Saaybarka"** waxaa loola jeedaa fal ama isku-day kasta oo guulaysta ama guul-darraysta si loo helo gelitaan aan la oggolaayn, carqaladayn ama si- xun-u-adeegsi shabakadaha & nidaamyada macluumaadka (information systems);
4. **"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknolojiyada, Xukuumadda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.
5. **"Wasaaradda"** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Isgaadhsiinta & Teknolojiyada, Xukuumadda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

6. **“Hay’adda”** waxaa loola jeedaa Hay’adda Amniga Saaybarka(cyber-security) ee lagu asaasay si waafaqsan Qodobka 5aad ee Sharcigan;
7. **“Hawl-wadeenka Kaabayaasha Muhiimka ah”** waxaa loola jeedaa milkiilaha ama hawl-wadeenka kaabayaasha muhiimka ah, ama markay jirto wadalaahaansho, hawl- qabad wadajir ah, ama ciddii xaaladahaas midkood ku sugan;
8. **“Sectoral CERT”** waxaa loola jeedaa koox ka fal-celisa xaaladaha degdegga ah ee kumbuyuutarka ee loo asaasay si waafaqsan Qodobka 12aad ee Sharcigan;
9. **“SOM-CERT”** waxaa loola jeedaa koox ama xarun ka fal-celisa xaaladaha degdegga ah ee kombiyuutarka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS);
10. **“JFS”** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya;

Qodobka 3^{aad}:
Ujeeddooyinka Sharciga

1. Magacaabista hay'ad, bixinta habraacyo looga hortagayo, laguna maareynayo, isla markaana looga fal-celinayo shilalka Amniga Saaybarka.
2. Hubinta in hawl-wadeennada kaabayaasha muhiimka ah ay hirgeliyaan tallaabooyin iyo wadashaqayn ku aaddan arrimaha Amniga Saaybarka.
3. Sare-u-qaadidda horumarinta iyo wacyi-gelinta Amniga Saaybarka.

Qodobka 4^{aad}:
Baaxadda Sharciga

Sharcigani wuxuu khuseeyaa hawlaha Amniga Saaybarka iyo kaabayaashaa muhiimka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

CUTUBKA LABAAD
KAALINTA HAY'ADDA AMNIGA SAAYBARKA QARANKA.

Qodobka 5^{aad}:
Hay'adda Amniga Saaybarka Qaranka

1. Sharcigani wuxuu dhisayaa Hay'adda Amniga Saaybarka Qaranka, oo leh shakhsiyad qaanuuni ah, awoodna u leh in ay hanti yeelato, gasho heshiis dhaqangal ah (contract), waajibaadna lagu yeesho, taasoo la dacweyn karo waxna dacweyn karta iyadoo adeegsanaysa magaceeda si waafaqsan shuruucda dalka.
2. Hay'addu waxay u madax-bannaan tahay gudashada xilalkeeda iyo waajibaadkeeda si waafaqsan Sharcigan.
3. Iyadoo aan wax loo dhimayn faqradda (2) ee qodobkan, Hay'addu:
 - b. Waxay tixgelinaysaa tilmaamaha guud iyo siyaasadaha uu ku hago sharcigan iyo haddii ay soo baxaan shuruuc kale oo dawladdu soo saarto; iyo
 - t. Waxay u hoggaansamaysaa tilmaamaha Wasiirka iyo Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda JFS, iyadoo la eegayo danaha amniga, nabadgelyada guud iyo difaaca qaranka JFS.
 - j. Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolojiyada ee JFS, wuxuu Maareeyaha Guud ee Hay'adda u idman karaa hawlaha farsamo ee lagu fulinayo sharcigan.

Qodobka 6^{aad}:
Awoodaha iyo Waajibaadka Hay'adda Amniga Saaybarka Qaranka

1. Horumarinta, daabacaadda, hirgelinta, joogteynta iyo kormeeridda istaraatiijiyadda qaran ee amniga saaybarka.
2. Qoondoynta iyo joogteynta diiwaanka kaabayaasha muhiimka ah.
3. Soo-saarista halbeegyada amniga saaybarka ee ay ku shaqeynayaan kaabayaasha muhiimka ah.
4. Samaynta kormeer mideysan iyo mid aan mideysnayn (ad hoc) laguna sameynayo kaabayasha muhiimka ah.

5. Kor-joogteynta hawlaha SOM-CERT.
6. Dhaqan-gelinta waajibaadka shaqo ee hawl-wadeennada kaabayaasha muhiimka ah, iyo baarista xad-gudubyada laga yaabo inay dhacaan.
7. Sare-u-qaadista wacyi-gelinta khataraha amniga saaybarka, xirfadaha, aqoonta iyo dhaqamada amniga saaybarka.
8. Dhiirri-gelinta iyo hirgelinta tallaabooyinka kor loogu qaadayo amniga saaybarka ayadoo la adeegsanayo teknoolajiyada iyo maamulka.
9. Talo-siinta wasaaradaha iyo hay'adaha JFS iyo dawlad-goboleedyada ee arrimaha ku saabsan amniga saaybarka.
10. Soo-saarista iyo daabacaadda tilmaameyaal ku saabsan amniga saaybarka ee ay fulinayaan hay'adaha dawlaga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay ama arrimaha kale ee la xiriira fulinta Sharcigan.
11. Dhisidda iyo isku-dubaridka habab iskaashi-wadaag ah oo ka dhexeeya hay'adaha dawlaga ah iyo kuwa gaarka ah, si looga hortago loona xalliyo shilalka iyo khataraha amniga Saaybarka.
12. Ku-matalidda JFS hay'adaha caalamiga ah, dawladaha shisheeye iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee arrimaha ku aaddan amniga saaybarka.
13. Fududaynta u-hoggaansanaanta mabaadi'da amniga Saaybarka caalamiga ah ee JFS, oo ay ku jiraan heerarka waajibaad kasta oo ay dejiyaan heshiisyada caalamiga ah iyo heshiisyada ay JFS qeybta ka tahay.
14. Ka-qeyb-galka fagaarayaasha caalamiga ah iyo la-shaqeynta wasaaradaha iyo hay'adaha ku hawlan amniga saaybarka iyo sidoo kale wadamada kale, si la isku weydaarsado xogaha iyo isku-dubaridka siyaasadaha iyo xeer-nidaamiyeyasha la xiriira khataraha Saaybarka (cyber-threat) iyo amniga Saaybarka.
15. La-shaqeynta hay'adaha dawlaga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay, iyadoo looga golleeyahay gudashada shaqooyinka iyo gacan-siinta hay'adaha si ay u diyaariyaan siyaasado, habraacyo iyo hannaan waafaqsan Sharcigan.

Qodobka 7^{aad}:

Qaabdhismeedka iyo Guddiga Amniga Saaybarka Soomaaliya

1. Guddiga Amniga Saaybarka Soomaaliya, oo ka kooban Sagaal (9) xubnood oo kala ah:
 - b. Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolojiyada JFS oo noqonaya guddoomiyaha guddiga;

- t. Wasiirka Wasaaradda Amniga JFS;
 - j. Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha JFS;
 - x. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda JFS;
 - kh. Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawada JFS;
 - d. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda JFS;
 - r. Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka JFS;
 - s. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha JFS; iyo
 - sh. Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga JFS.
2. Maariyaha Guud ee Hay'addu ayaa noqonaya xoghayaha guddiga, hase yeeshee ma ahan xubin joogta ah oo ka tirsan guddiga.
 3. Qaabdhismeedka hay'adda Amniga Saaybarka Qaranka, wuxuu noqonayaa sidan soo socota:
 - b. Maareeyaha Guud
 - t. Maareeye Ku-xigeen
 - j. Guddiga Hay'adda waxaana Guddoomiye u ah Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta & Teknooloojiyadda.
 - x. Sidoo kale hay'addu waxay yeelan kartaa waaxyo kala duwan oo hoos yimaadda.

Qodobka 8aad:
Aasaasidda Guddiga Amniga Saaybarka

Sharcigan waxaa lagu aasaasay Guddiga Amniga Saaybarka oo ka kooban sagaal (9) xubnood

Qodobka 9aad:
Xilka iyo Waajibaadka Guddiga

Waajibaadka Guddiga Amniga Saaybarka waa :

1. Inuu fududeeyo is waydaarsiga xogta, isku duwidda iyo wada shaqaynta ka dhexaysa hay'adaha ku xusan qodobka 7aad ee sharcigan.
2. Dejinta siyaasado lagu ilaalinayo kaabayaasha muhiimka ah iyo arrimaha kale ee amniga saaybarka ama arrin kasta oo kale oo la xiriirta ku hawl-gelidda Sharcigan.
3. Soo-jeedinta xeer-nidaamiyeyaal iyo hab-raacyo lagu horumariyo istaraatiijiyadda iyo siyaasadaha la xiriira amniga saaybarka iyo habsami-u-

dhaqan-gelinta Sharcigan.

Qodobka 10^{aad}:
Mudada Xil-haynta Hay'adda

Maareeyaha, ku-xigeenkiisa, iyo xubnaha kale ee Guddiga Hay'adda waxay xilka xubinnimada haynayaan muddo Afar (4) sano ah oo loo cusboonaysiin karo hal mar oo kaliya.

Qodobka 11^{aad}:
Mas'uuliyadda Hay'adda

Mas'uuliyiinta Hay'addu waxay mas'uul ka yihiin arrimaha soo socda:

1. Inay meel mariyaan miisaaniyadda iyo qorshe-hawleedka Hay'adda kadib marka uu horkeeno maareeyuhu.
2. Inay kor kala socdaan sida loo dhaqan-gelinaayo sharcigaan iyo qorshaha waxqabadka ee ay horumariyeen.
3. Inay u gudbiyaan Wasaradda warbixinta la xiriirta qaabka loo maamulo
4. Hay'adda, markii laga codsado ama ay ayagu u arkaan lagama maarmaan.

Qodobka 12^{aad}:
Gunnadda Xubnaha Hay'adda

Shaqada Hay'addu waa Shaqo waqti-dhiman, waxaana loo magacaabayaa Dad shaqooyin kale haysta, waxayna yeelanayaan gunno marka ay shirayan, waxaana lagu xadidi doona Xeer-hoosaadka hay'adda, oo ay xaq u yeelanayaan in laga bixiyo wixii kharash ah ee lagu galo shirarka.

Qodobka 13^{aad}:
Qaabka Magacaabidda Madaxda Hay'adda

Magacaabida Maareeyaha iyo Maareeye ku-xigeenka Hay'adda waxay imaanaysaa kadib markii Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta & Teknoolojiyada uu u soo jeediyo Golaha Wasiiradda ayna meel mariyaan, Ra'isul-Wasaaruhuna uu ku soo saaro dikreeto kadibna lagu Faafiyo Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Qodobka 14^{aad}:
Mas'uuliyadda Maareeyaha Guud

1. Maareeyaha Guud waa mas'uulka ugu sarreeya maamulka hay'adda saaybarka Soomaaliya
2. Wuxuu mas'uul ka yahay hogaaminta iyo fulinta hawl-maalmeedka Hay'adda, sidoo kale wuxuu ilaalinayaa sugnaanshaha habsami-u- socodka hay'adda si ay u gaarto ujeedooyinka loo xilsaaray, sida dhaqan-gelinta sharcigan iyo xeer- hoosaadka u degsan hay'adda.(halkan sidee isugu qabtaa haha)
3. Xiriirka hay'adda iyo hay'adaha kale ee Dawladda ama kuwa gaarka loo leeyahay iyo in uu matalo, kuna hadlo magaca Hay'adda Saaybarka Soomaaliya.
4. Kormeeridda iyo ilaalinta habsami-u-socodka hawlaha hay'adda ee loo xilsaaray.
5. Wuxuu horgeeynayaa maamulka Hay'adda miisaaniyadda ku-talogalka Hay'adda si ay uga doodaan kadibna u ansixiyaan inta aan loo gudbin Wasaaradda Maaliyada ee JFS ayadoo la sii marinayo Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknolojiyada.
6. Wuxuu horgeeynayaa hay'adda qorshaha shaqo iyo hiigsiga Hay'adda waqtiga dhow iyo waqtiga dheer ee hagaajinta iyo tayeynta qeybta Amniga Saaybarka.

Qodobka 15^{aad}:
Mas'uuliyadda Maareeye Ku-xigeenka

1. Wuxuu buuxiyaa kaalinta Maareeyaha marka uu maqan yahay ama ay ku yimaadaan duruufo ka hor-istaagi kara gudashada waajibaadkiisa.
2. Wuxuu qabanayaa wixii kale ee uu Maareeyuhu u xil saaro.

Qodobka 16^{aad}:
Sababta lagu waayi karo Xilka

1. Madaxda sare iyo dhamaan shaqaalaha kale ee Hay'adda waxa ay xilka ku waayi karaan in looga qaado sida ay ku yimaadeen ama si waafaqsan sharciga shaqaalaha rayidka Dawladda.

2. In ay geeri ku timaado.
3. Isasilaad uu u soo gudbiyo lagana aqbalo.
4. Caafimaad-daro keeni karta gudasho la'aan waajibaadka shaqada.
5. Xil-gudasho la'aan ama musuq-maasuq uu ku sameeyo shaqada.
6. Ku-xadgudub Sharciga Amniga Saaybarka iyo xeer-hoosaadyada hay'adda iyo shuruucda kale ee Dalka.
7. Xil-kaqaadista xubnaha sare ee hay'adda waxaa loo marayaa si lamid ah qaabkii loo maray magacaabidooda.

Qodobka 17^{aad}:
Magacaabidda Kaabayaasha Muhiimka ah

1. Wasiirku wuxuu mas'uul ka yahay magacaabidda kaabayaasha muhiimka ah iyo hagaajinta hawlaha hawl-wadeennada kaabayaasha muhiimka ah.
2. Wasiirku wuxuu u asteynayaa hantida la taaban karo iyo tan danabaysan ee aan la taaban karin, shabakadaha iyo nidaamyada macluumaadka (information systems) inay yihiin kaabayaasha muhiimka ah haddii Hay'addu u aragto in ay lama-huraan u yihiin:
 - b. Amniga qaranka; ama
 - r. Daryeelka dhaqaalaha bulshada iyo danta muwaadinka.
3. Hay'addu waa inay ku wargelisaa hawl-wadeennada kaabayaasha muhiimka ah qoondaynta lagu sameeyey Qodobka 2aad ama laga saaray faqradda (5) ee qodobkan, waana inuu Wasiirku ku daabacaa qoondaynta ama ka-saaridda mareegaha wasaaradda iyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
4. Marka la samaynayo qoondaynta sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan, Wasiirku wuxuu tixgelinayaa muhiimadda ay leedahay hantida kaabayaasha dhaqaale (virtual infrastructure assets) ee elektaroonigga ah ama nidaamka macluumaadka (information system) sida:
 - b. Amniga, difaaca ama xiriirrada caalamiga ah ee JFS;
 - t. Bixinta adeegyada la xiriira:
 - i. Isgaadhsiinta elektaroonigga ah;
 - ii. Bankiyada iyo adeegyada kale ee maaliyadeed;
 - iii. Awoodda korontada;

- iv. biyaha iyo bullaacadaha;
 - v. gaarsiinta cuntada; iyo
 - vi. gaadiidka dadweynaha;
 - j. Ilaalinta Bed-qabka iyo caafimaadka dadweynaha oo ay ku jiraan nidaamyada (systems) la xiriira adeegyada degdegga ah ee muhiimka ah; iyo
 - x. Hay'adaha Sharci-dejinta, Fulinta iyo Garsoorka.
5. Wasiirku wuxuu meesha ka saarayaa magacaabidda kaabayaasha muhiimka ah haddii magacaabidda noocan oo kale ahi aan loo baahnayn, iyadoo lagu xisaabtamayo, lana tixgelinayo faqradda (4) ee Qodobkan.
 6. Hay'addu waa inay ku wargelisaa hawl-wadeennada kaabayaasha muhiimka ah qoondeynta lagu sameeyey Qodobka 2aad ama laga saaray faqradda (5) ee qodobkan, waana inuu Wasiirku ku daabacaa qoondeynta ama ka-saaridda mareegaha wasaaradda iyo faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Qodobka 18^{aad}:

Diiwaan-gelinta Kaabayaasha Muhiimka ah ee La Magacaabay

1. Hay'addu waa in ay haysaa Diiwaanka ugu dambeeya ee kaabayaashamuhiimka ah ee la qoondeeyey oo ay ku jiraan aqoonsigooda iyo xogaha xiriirka hawl-wadeen kasta iyo xog kasta oo loo baahan yahay inay Hay'addu ku darto.
2. Hay'addu waa inay siisaa nuqul ka mid ah diiwaanka hawl-wadeen kasta oo ka diiwaan-gashan kaabayaasha muhiimka ah.
3. Hawl-wadeenka ka diiwaan-gashan kaabayaashamuhiimka ah waa inuu ku wargeliyaa Hay'adda, isbeddel kasta oo ku yimaada lahaanshaha kaabayaashamuhiimka ah ama isbeddel kasta oo ku yimaada qofka ama cidda mas'uulka ka ah ka-shaqeynta kaabayaashamuhiimka ah muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda isbeddelkaas.
4. Hay'addu waa inay soo saartaa oo ay daabacdaa hab-raacyada diiwaan-gelinta iyo ogeysiinta shuruudaha ku tilmaaman qodobkan.

Qodobka 19^{aad}:
Hal-beegyada iyo Kormeerka

1. Hay'addu iyadoo tixraacaysa xeer-nidaamiyeyaasha (regulations) waxay soo saari kartaa oo daabici kartaa heerarka amniga Saaybarka ee hawl-gelinta kaabayaashamuhimka ah guud ahaan, iyo wax kasta oo si gaar ah loogu dabaqi karo kaabayaal kasta oo muhiim ah, oo ay Hay'addu u aragto in ay ku habboon tahay ka-hortagga, yareynta ama wax-ka-qabashada dhacdooyinka amniga Saaybarka iyadoo tixraacaysa xeer-nidaamiyeyaasha ku habboon, ka dib ansixinta Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolojiyada oo cuskanaya qodobka 102 (1) ee Dastuurka KMG ah ee JFS.
2. Hay'addu, iyadoo kaashanaysa hay'ad kasta oo khibrad u leh, waxay sameyn kartaa kormeer iyo baaris muddeysan iyo mid aan muddeysnayn (ad hoc) ee kaabayaashamuhimka ah si loo hubiyo u-hoggaansanaanta Sharcigan.

CUTUBKA SADDEXAAD
KOOXDA KA-FAL-CELINTA DEGDEGGA AH EE KUMBUYUUTARKA

Qodobka 20^{aad}:

**Asaaska Kooxda Ka-falcelinta Degdegga ah ee Kumbuyuutarka
Soomaaliya (SOM-CERT)**

1. Hay'addu waxay hawl-gelinaysaa xoogagga ka-fal-celinta degdegga ah ee amniga Saaybarka oo loo yaqaan SOM-CERT oo hoos yimaaad Hay'adda Amniga Saaybarka.
2. SOM-CERT waxay yeelanaysaa xilalka iyo waajibaadka soo socda:
 - b. waxay heli kartaa, qiimeyn kartaa warbixinnada dhacdooyinka amniga Saaybarka iyo khataraha (threats) ka imaanaya hawl-wadeennada kaabayaashamuhimka ah iyo cid kasta oo kale oo sheegi karta dhacdooyinka amniga Saaybarka;
 - t. waxay bixin kartaa digniino hore, ogeysiisyo iyo faafinta macluumaadka ku saabsan dhacdooyinka amniga saaybarka iyo khataraha dhacdooyinkan oo kale;
 - j. waxay fududaysaa wadaagga macluumaadka ee hawl-wadeennada kaabayaashamuhimka ah si kor loogu qaado maareynta waxtarka leh ee dhacdooyinka amniga Saaybarka iyo khataraha dhacdooyinkan oo kale;
 - x. waxay kaalmeysaa hawl-wadeennada kaabayaashamuhimka ah si ay u qaadaan tallaabooyinka ka-hortagga, yareynta, hagaajinta iyo isku-dubaridka jawaabaha la xiriira dhacdooyinka amniga saaybarka iyo khataraha dhacdooyinkan oo kale;
 - kh. Isku-dubaridka hawlaha CERT-yada (sectoral CERT) ee lagu asaasay qodobka 12aad ee Sharcigan;
 - d. Waxay siisaa taageero farsamo hay'adaha fulinta sharciga iyo hay'adaha amniga taasooku saabsan lafo-guridda iyo baarista dhacdooyinka amniga Saaybarka iyo dacwad-oogista dembiyada la xiriira;
 - r. sare-u-qaadista, hirgelinta iyo isticmaalka guud ama sidii lagu yiqiin ee dhacdooyinka amniga saaybarka iyo habraacyada ka-falcelinta khatarta;
 - s. Sare-u-qaadista cilmi-baarista iyo horumarka teknoolojiyadda si kor

loogu qaado amniga saaybarka;

sh. Kormeeridda isbeddellada iyo siinta falanqeyn ku saabsan isbeddellada dhacdooyinka amniga Saaybarkaiyo khataraha dhacdooyinkan oo kale ee saameyn kara JFS;

dh. Waa inay kor-u-qaadaan ka warqabka khataraha amniga Saaybarka, xirfadaha, aqoonta iyo dhaqamada amniga saaybarka;

c. Siinta taageero farsamo wasaaradaha, waaxyaha iyo hay'adaha kale ee dawlaga ah guud ahaan arrimaha khuseeya amniga saaybarka; sida

g. Siinta Hay'addaha warbixinaha ku saabsan dhacdooyinka amniga saaybarka sida ku xusan cutubkan;

f. Iskaashiga ururrada caalamiga ah, dawladaha shisheeye, ururrada gaarka loo leeyahay iyo amniga kombiyuutarrada iyo kooxaha ka-falcelinta dhacdooyinka iyo kooxaha la midka ah ee awoodaha kale ee is-dhaafsigu macluumaadka farsamada iyo horumarinta iyo hirgelinta tallaabooyinka ka-hortagga, yareynta iyo hagaajinta ee la xiriira dhacdooyinka amniga saaybarka iyo hanjabaadaha dhacdooyinkan oo kale; iyo

q. Waajibaadka iyo hawlaha kale ee ay Hay'addu magacaabi karto iyadoo lagu daabacayo faafinta rasmiga ah

Qodobka 21^{aad}:

Qeybta KOOXDA Ka-fal-celinta Degdegga Ah ee Kumbuyuutarka, (CERTS)

1. Hay'addu waa in ay si joogto ah ula tashataa wasaaradaha iyo hay'adaha ay khusayso ee heer Federaal, heer dawlad-goboleed iyo hawl-wadeennada kaabayaashamahiimka ah si loo go'aamiyo in la sameeyo hal ama in ka badan oo ah Xoogagga Ka-fal-celinta xaaladaha degdegga ah ee kombiyuutarka (CERTs), Isla markaana loo dammaanad-qaado qeyb gaar ah oo ka mid ah dhaqaalaha.
2. Marka la sameynayo go'aanka hoos imaanay qodobka 1aad ee Sharcigan, Hay'addu waxay tixgelinaysaa:
 - b. Nooca iyo heerka khataraha amniga saaybarka ee soo wajahaya qeybtan;
 - t. Muhimadda dhaqaalaha ee qeybtan;
 - j. Diyaar-garowga hawl-wadeennada kaabayaashamahiimka ah ee khataraha dhacdooyinka amniga saaybarka ee qeybtan; iyo
 - x. Haddii la sameeyo xoogagga Ka-fal-celinta Xaaladaha Degdegga ah ee

kumbiyuutarrada (CERTs), waxay suurto-galinaysaa horumarka amniga internet-ka ee qeybtan.

3. Haddii ay hay'addu go'aamiso in qeybta CERT-ga loo baahan yahay sida ku cad Qodobka 1aad ee Sharcigan, Hay'addu waxay hagaysaa hawl-wadeennada kaabayaashamuhimka ah ee qeyb kasta oo ka mid ah dhaqaalaha si ay u abuuraan Kooxda Ka-jawaabidda Degdegga ah ee Kumbiyuutarada, (CERTs).
4. Marka la dhiso Qeybta CERT sida ku xusan faqradda (3) ee qodobkan, Hay'addu waa inay caddeysaa waajibaadka iyo shaqada ay CERT ka yeelan doonto qeybta ay khusayso ee dhaqaalaha.
5. Kharashka Qeybta Xoogagga Ka-falcelinta Xaaladaha Degdegga ah ee kumbiyuutarada ee lagu dhisay faqradda (3) ee qodobkan, waxaa bixinaya hawl-wadeennada kaabayaashamuhimka ah ee qeybta ay khusayso.
6. Halka qeybta ay khusayso ay ku jiraan wax ka badan hal hawl-wadeen oo ka shaqeeya kaabayaashamuhimka ah kuwaas oo aan ku heshiin saami-qeybsiga dhaxdooda ah ee kharashaadka Qeybta Xoogagga Ka-fal-celinta Xaaladaha Degdegga ah ee Kumbiyuutarrada (CERTs), Hay'addu waxay go'aaminaysaa qeybinta kharashaadkaas dhexdooda ah.
7. Qeybaha Ka-fal-celinta Xaaladaha Degdegga ah ee kombiyuutarku (CERT) waa in ay u warbixiso ama wargeliso oo ay kormeeraan Hay'adda iyo wasaaradda mas'uulka ka ah qeybtaas.

CUTUBKA AFARAAD
WAAJIBAADKA HAWL-WADEENNADA KAABAYAASHA MUHIIMKA AH

Qodobka 22^{aad}:
Qiimeyn-xilliyeedka

1. Hawl-wadeenka kaabayaasha muhiimka ah waa inuu sameeyaa oo u soo gudbiyaa Hay'adda nuqullada qiimeyn-xilliyeedka (periodic assessment) amniga Saaybarka oo leh qaab iyo hab ay Hay'addu u asteysay.
2. Qiimeyn-xilliyeedka ku tilmaan faqradda (1) ee qodobkan, waa in qiimeynta lagu daraa:
 - b. Khatarta iyo cawaaqibta ka iman kara dhacdooyinka amniga Saaybarka ee la xiriira kaabayaasha muhiimka ah;
 - t. U-nuglaanshaha, u-diyaarsanaanta iyo ku-filnaanta yareynta tallaabooyinka dhacdooyinka amniga Saaybarka; iyo
 - j. Tallaabooyinka loo baahan yahay si loo hubiyo u-diyaar-garowga ka-hortagga, yareynta iyo Ka-fal-celinta dhacdooyinka amniga saaybarka.

Qodobka 23^{aad}:
Magacaabidda Saraakiisha Amniga Saaybarka

Hawl-wadeenka kaabayaasha muhiimka ah ayaa magacaabaya sarkaal sare oo mas'uul ka ah amniga Saaybarka oo ay ku jiraan kormeerka:

- b. U-diyaar-garowga, la-socodka iyo ka-warbixinta amniga saaybarka ee hawl-wadeenka; iyo
- t. La-shaqeynta iyo isku-xirka Hay'adda iyo Hay'adaha kale ee khuseeya.

Qodobka 24^{aad}:
Wajibaadka Ka-warbixinta Shilalka Amniga Saaybarka

1. Hawl-wadeenka Kaabayaasha Muhiimka ah oo ay saameysay dhacdada amniga internet-ka ama khatar waa inuu sameeyaa:
 - b. Uruurinta macluumaad ku saabsan dhacdo ama khatar, oo ay ku jiraan dabeecadda iyo saameynta dhacdada amniga saaybarka;

- t. Qiimeynta halista kaabayaasha muhiimka ah, macaamiisha, adeeg-bixiyeyaasha (suppliers) iyo daneeyeyaasha kale;
 - j. Qaadid tallaabooyin ku habboon ka-hortagga, yareynta iyo hagaajinta si loo xaddido khatartaas;
 - x. Uga warbixiyaa Hay'adda dhammaan xogaha muhiimka ah ee ku saabsan dhacdada amniga saaybarka iyo Hay'adaha kale oo ay khusayso muddo afar iyo labaatan (24) saac gudahood ah ka dib markii dhacdada la ogaaday;
 - kh. Bixiyaa xogaha kale ee la xiriira dhacdada amniga Saaybarka ee Hay'adda ama Hay'adaha kale ee ay khuseyso oo laga yaabo inay codsadaan; iyo
 - d. U oggolaadaa Hay'adda iyo Hay'adaha kale oo ay khuseyso inay galaan shabakadeeda iyo kaabayaasha macluumaadka (information infrastructures) ujeedooyinka soo socda:
 - i. Falanqeynta dhacdada amniga saaybarka;
 - ii. Ogaanshaha khataraha kale ee ka iman kara dhacdooyinkan oo kale;
 - iii. Aqoonsashada carqalad kasta oo ku timaada adeegga ku tiirsan kaabayaasha muhiimka ah;
 - iv. La-talinta tallaabooyinka ka-hortagga, yareynta sama hagaajinta.
2. Marka la tixgelinayo muhiimadda Kaabayaasha oo ay saameysay dhacdada shilka amniga saaybarka ee ku tilmaaman faqradda (1) (b) ee qodobkan, hawl-wadeennada kaabayaasha muhiimka ah waa inay ku xisaabtamaan:
- b. Dabeecadda carqalad kasta oo ku timaada adeegga ku tiirsan kaabayaasha muhiimka ah;
 - t. Tirada dadka ay saameysay carqalad kasta;
 - j. Muddada dhacdooyinka amniga saaybarka; iyo
 - x. Aagga juqraafi (geographical area) ay saameysay dhacdada amniga saaybarka.
3. Warbixinta looga baahan yahay faqradda (1) (x) ee qodobkan waa inay ahaataa qaab uu Wasiirku u qoray isagoo la tashanaya maamulka Hay'adda.

Qodobka 25^{aad}:

Ilaalinta Siyaasadda iyo Dhaqan-gelinta Habraacyada

1. Hawl-wadeenka kaabayaasha muhiimka ah waa inuu hormariyaa, joogteeyaa, isla markaana dhaqan-geliyaa siyaasadaha ku habboon, habraacyada, farsamooyinka iyo hannaankooda, si uu:
 - b. U maareeyo khataraha ku imaan kara amniga shabakadaha iyo kaabayaasha macluumaadka oo ay ku tiirsan yihiin kaabayaasha muhiimka ah; iyo
 - t. Uga hortago, yareeyo oo hagaajiyo (remedy) dhacdooyinka amniga Saaybarka, iyadoo ujeeddadu tahay in la hubiyo sii-socoshada adeegyada ku tiirsan kaabayaasha muhiimka ah.
2. Hawl-wadeenka kaabayaasha muhiimka ah waa inuu:
 - b. La socodsiiyo shaqaalihiiisa siyaasadaha, hannaanka iyo hab-raacyada ku cad faqradda (1) ee qodobkan;
 - t. Dhawro diiwaannada caddeynaya u-hoggaansanaanta shuruudaha cutubkan iyo wax kastoo kale oo loo baahan yahay ee la xiriira amniga saaybarka; iyo
 - j. U diyaariyo Hay'adda marka ay ka codsato nuqullada siyaasadaha, hannaanka, hab-raacyada iyo diiwaannada looga baahan yahay faqradda 1aad ee qodobkan.

Qodobka 26^{aad}:

Tallaabooyinka Amniga Saaybarka

1. Hay'addu, iyadoo la tashanaysa Wasaaradaha iyo Hay'ad kasta oo ka mas'uul ah kaabayaasha muhiimka ah, waxay fari kartaa hawl-wadeenka kaabayaasha muhiimka ah inuu qaado tallaabo ka-hortag, yareyn ama hagaajin la xiriirta shil amniga Saaybarka ah ama mid ka mid ah khataraha.
2. Amar kasta oo ku cad faqradda (1) ee qodobkan, waa inuu noqdaa mid maangal ah oo ku habboon iyadoo la tixgelinayo khatarta dhacdooyinka amniga Saaybarka, kharashaadka iyo saameynta la filayo ee ka-hortagga, yareynta ama hagaajinta.
3. Hawl-wadeenka kaabayaasha muhiimka ah waa inuu u hoggaansamaa amarka ku cad faqradda (1) ee qodobkan.

Qodobka 27^{aad}:
U-hoggaansanaan La'aanta Waajibaadka

1. Hawl-wadeenka kaabayaasha muhiimka ah ee si ku-talo-gal ah u dayaca gudashada waajibaadka ka saaran cutubkan wuxuu gelayaa xad-gudub (offence).
2. Qofka gala xad-gudubka ku tilmaaman faqradda 1aad ee qodobkan, wuxuu mutaysanayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn US\$3,000 (saddex kun) oo doollarka mareykanka ah ama lacag shillin Soomaali u dhiganta, ama xarig muddo aan ka badnayn 6 (lix) bilood ama labadaba.

CUTUBKA SHANAAD

WADAAGISTA MACLUUMAADKA

Qodobka 28^{aad}:

Wadaagista Macluumaadka

1. Hay'adda, wasaaradaha, hay'adaha fulinta sharciga iyo hay'adaha amniga qaranka waxay xogta la wadaagi karaan midba midka kale iyo mas'uuliyiinta maamullada kale haddii loo baahdo:
 - b. Ujeeddooyinka sharcigan ama fududaynta fulinta hawl kasta oo halkan hoos timaada;
 - t. Ujeeddooyinka amniga qaranka; sama
 - j. Ujeeddooyinka la xiriira ka-hortagga ama ogaanshaha faldembiyeedka baarista dembiga ama hab-dhaqanka dacwad-qaadista.
2. Macluumaadka la wadaagay sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan, lagama yaabo in lala wadaago qof kale ujeeddo kasta oo aan ka ahayn ujeeddooyinka ku xusan faqradda (1) ee qodobkan ilaa si kale ay ku heshiiyaan wasaaradda ama hay'adda la wadaagtay.
3. Wadaagista macluumaadka sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan, waa inay ku koobnaataa macluumaadka khuseeya oo la jaan-qaadaya ujeeddooyinka wadaagga macluumaadka.
4. Marka la wadaagayo macluumaadka sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan, waa in fiiro gaar ah loo yeesho macluumaadka qarsoodiga ah ama wax u dhimi kara amniga ama danaha ganacsi ee hawl-wadeennada kaabayaasha muhiimka ah.
5. Hay'addu waxay awood u leedahay in ay ku wargeliso dadweynaha dhacdooyinka amniga saaybarka haddii ay hay'addu u aragto, si meel-mar ah, in wacyigelinta bulshadu ay lagama-maarmaan tahay, in si hufan looga jawaabo ama looga hortaggo dhacdooyinka amniga saaybarka.

CUTUBKA LIXAAD

QODOBBO KALA DUDUWAN

Qodobka 29^{aad}:

Xeer-nidaamiye

1. Wasiirka wuxuu soo saarayaa xeer-nidaamyeyaal, habraacyo, tilmaamo iyo hageyaal lagu nidaaminayo hawlaha Hay'adda si waafaqsan sharcigan.
2. Iyadoo aan waxba loo dhimayn guud ahaan faqradda (1) ee qodobkan, xeer-nidaamiyeyaaashu waxay siin karaan:
 - b. Dowlad-dhiska, maal-gelinta iyo maamulidda maaliyadda arrimaha Hay'adda;
 - t. Habka ay Hay'addu u isticmaali karto awood kasta ama ay u fulin karto hawl kasta oo hoos timaada Sharcigan;
 - j. Arrin kasta oo hoos timaada sharcigan ee loo baahan yahay ama la oggol yahay in lagu qeexo xeer-nidaamiyaha; sama
 - x. Arrin kasta oo Wasiirku u arko inay lagama-maarmaan u tahay ama ku habboontahay si loo dhaqan-geliyo ujeeddooyinka sharcigan.

Qodobka 30^{aad}:

Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qodobka 31^{aad}:

Dhaqangal

Sharcigani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay ansixiyaan Baarlamaanka JFS, isla markaasna uu saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.